



XAQIIQOYINKA KOOBAN EE KU SAABSAN

Waxaa isbeddel ku imaan doonaa Medicaid, Child Health Plus, iyo Dadka ka diiwaangashan Essential Plan

NY State of Health waa New York Goobteeda Suuqa Qorshaha Caafimaadka ee Rasmiga ah.

Haddii aad tahay 19 sano jir ama aad kasii wayn tahay aadna ku nooshahay Gobalka New York, waxaanu kaa caawin karnaa helida caymiska caafimaadka ah kharash aad awoodi karto.

Sideen isu diiwaangelinayaa?


 nystateofhealth.ny.gov

AMA

 1-855-355-5777 ama

TTY: 1-800-662-1220

AMA

 Ayadoo loo maraayo caawimada gaarka ah ee bilaashka ah ee uu bixiyo caawimaad bixiye la ansixiyey oo u dhow gurigaaga ama goobta shaqada.

NY State of Health waxay u hoggaansantaa sharciyada xuquuqaha Dadwanaha ee Federaalka iyo sharciyada gobalka, cidnana kuma takoorto arrimo la xariira isirka, midabka, asalka qaranka, caqiidada/diinta, sinjiga, da'da, heerka guurka/qoyska, diiwaanka xabsiga lagu qaatay, dembi kuhelida falka dambi, aqoonsiga sinjiga, qaabka galmada, sifooyinka u nuglaanshaha hidda sidaha, xaalada militarinimo, heerka gabood falka guriga ee dhibanaha iyo/ama aargoosiga.

Adiga ama xubin kamid ah qoyskaaga hadda maka haystaa caymis caafimaad Gobalka New York Medicaid, Child Health Plus ama Barnaamijka Essential Plan?

Gobalka New York wuxuu mar dhaw bilaabi doonaa inuu eego shuruudaha u qalmitaanka si uu u hubiyo in dadka diiwaanka gashan ay wali u qalmaan barnaamijyadaan. Arrintaan waxay la micno tahay in lagaaga baahan karo inaad qaado tallaabo aad ku cusbooneysiineyso caymiskaaga caafimaadka ama caymiska xubnaha qoyskaaga. Tusaale ahaan, Haddii dakhligaaga uu wax wayn iska badelay marka la eego dakhliga aad heli jirtay kahor inta uusan bilaaban aafada COVID-19, waa macquul inaad u baahato inaad xogtaas u gudbisno NY State of Health si aad wali oga sii diiwaangashanaato caymiska caafimaadka.

Waxaan halkaan ku qoran qaar kamid ah waxyaabaha aad sameyn karto hadda si aad u diyaargarowdo:

1 Iska qor barnaamijka fariimaha digniinaha ah.

Isqor si aad u hesho fariimaha qoraalka ah SMS/MMS ee laga soo diro NY State of Health si aadan u seegin xog muhiim ah oo ku saabsan caymiska caafimaadka, oo ay kujiraan goorta ay tahay inaad cusbooneysiiso caymiskaaga. Si aad iska diiwaangeliso, **qoraal aad ku qortay START u dir 1-866-988-0327.**

2 Xaqiiji in ciwaankaagu saxan yahay.

Xaqiiji in NY State of Health ama xafiiska Medicaid ee deegaankaaga ay hayaan ciwaankaaga boostada ee hadda, taleefan lambarkaaga iyo ciwaanka iimaylka si ay kuula soo xariiraan marka ay rabaan inay kaala hadlaan caymiskaaga caafimaadka.

Haddii aad caymis ka hesho NY State of Health, waxaad:

- Wici kartaa 1-855-355-5777 (TTY: 1-800-662-1220)
- Ciwaankaaga ka geli kartaa nystateofhealth.ny.gov
- Qof ku caawiya ka heli kartaa <https://info.nystateofhealth.ny.gov/findassistor>

Haddii aad Medicaid ka hesho xafiiska Medicaid ee degmadaada ama Maamulka Ilaha Dadwaynaha ee Magaalada New York City (New York City's Human Resources Administration, HRA), la xariir xafiiska deegaankaaga adoo adeegsanaaya ciwaankaaga iyo meelaha lagaala soo xariiro.

3 La soco wixii soo kordha.

Booqo <https://info.nystateofhealth.ny.gov/COVID-19-Changes> si aad u hesho xog dheeraad ah. NY State of Health waxay si joogto ah xog cusub usoo gelin doontaa boggaan.